

Sharciga 15 Febraayo 1961, lamba. 10

Dhismaha Dadweyne u Doodaha arrimaha Sharecada.

MADAXWEYNHA KU-MEELGARKA EE JAMHUURIYADDA

Marka uu arkay qoraalka meelmarinta Golaha Xeer-dejinta Qaranka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

Qod. 1

Waxaa laga dhisay Xaafiiska Dadweyne u Doodaha Soomaaliya Xaafiiska Dadweyne u Doodaha arrimaha Sharecada oo xaafiiskaas hore ka tirsan. Xaafiiska Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada waxaa hagaya garsoore lagu magacaabo Xeer Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu ku soo taliyo Wasiirka Cafiska iyo Garsoorka, uuna dhagaysto talada Golaha Adeegga Garsoorka ayna ku xigto meelmarinta Golaha Wasiirada.

Qod. 2

Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada wuxuu ka codsan karaa, marka kasta, Qaalliyada iyo Guddoomiyaha Maxkamadda Qaalliga gal kasta.

Masuuliinta laga codsaday waa in ay soo wareejiyaan galka 15 cisha oo ka bilaabata marka la weydiistay isla markaasna Dadweyne u Dooduhu waa inuu isaguna u soo celiyaa galka 15 gudahood. Muddada 15 cisho ee laga joogo la keeno, Qaalliyada ama Guddoomiyaha Maxkamadda Qaalliga waa in ay u soo gudbiyaan Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada nuqul, ku qoran afka carabiga, qaraar kasta oo go'aan looga gaaray khilaaf/muran, marka laga reebo qaraarada leh dabeecadda dacwa oogista.

Qod. 3

Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada wuxuu soo dhexgali karaa marka uu arko danta in si saxa loo tarajuma sharciga, dacwada kasta oo hortaalla Qaalliyada, ama Maxkamadda Qaalliga iyo arrimaha sharecada, Maxkamadda Sare horteeda.

Si loo si loo adeegsado hawlaha soo dhexgalka, waxaa ku filan in loo keeno garsooraha iqtisaaska u leh qoralka soo dhexgalka. Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada wuxuu qaadan karaa racfan 15 cisho ka dib marka uu helo xukunka, haddii la qoonsado xukunka Qaalliga iyo, isla muddadaas, wuxuu cabasha u qaadan karaa Maxkamadda Sare. Haddii aanu isticmaalin awoodda durista Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada wuxuu ku caddaynayaa nuqulka xukunka isago dul qoraya in uu arkay.

Durista xitaa waxa lagu keeni karaa taar/telegram ay wehliyan sababaha la xariira.

Awoodda durista waxaa loo adeegsan karaa si ka madax bannaan adeegsiga awoodda soo dhegalka.

Qod. 4

Dadweyne u Doodaha arrimaha sharecada lagama rabo bixinta canshuuraha waraaqaha dacwadda. Isaga laguma xukumi karo bixinta kharashka dacwadda, isagana looma xukumi karo, waxayse noqon karaan xaqaasiin abaalgudiyada Garsooraha.

Qod. 5

Xeerkaan wuxxun dhaqangalayaa marka lagu baahiyo Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda.

Xeerkan waxaa lagu dari doono Ururinta Xeerarka Rasmiga waxana lagu bahinayaa Fafinta Rasmiga. Qofkasta oo la soo gudboonaada waxaa ku wajiba in uu u hoggaansamo iyo in loo hoggansamo isago ah xeer Jamhuuriyadda.

Muqdisho, taariikhda 12, Jannaayo 1961.

Aadan Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Koobaad

CABCDO-RASHIID CALI SHERMAARKE

Wasiirka Cafiska iyo Garsoorka

MAXAMUUD AXMED MAXAMED